



Waxaad heshay kombuyutarkaagii (chromebook) oo ay la socoto heshiiska masuuliyada isticmaalkiisa, taas oo adiga iyo waalidkaa/Masuulkaaga aad saxeexdeen. Kombuyutarkan adiga ayaa laguu xilsaaray, adiga ayaana masuul ka ah ilaaliintiisa. Fadlan akhri maclumaadka soo socda si aad u fahamto masuuliyada kaa saaran iyo isticmaalkiisaba.

**Kombuyurarkaaga(chromebook)waxaa loo habeeyay inaan la geli karin inta u dhaxaysa 2:00am-6:00am Isniinta ilaa Jimcaha, 12:00am ilaa 8:00am Sabtida iyo Axada.**

- Rakibaada fidinta waa la curyaaminaya.
- Dugsiyada Highline ayaa ilaalinaya gelitaanka.

**Sharciga, Nidaamka isticmaalka qalabka teknolojiyada ee Degmada**

**Sharciga 2026** – ISTICMAALKA QALABKA TEKNOLOOJIYADA LA QAATO EE DEGMADU LEEDAHAY IYO MASUULIYADA ADEEGSIGA ARDAYGA

**Nidaamka 2026** - STICMAALKA QALABKA TEKNOLOOJIYADA LA QAATO EE DEGMADU LEEDAHAY IYO MASUULIYADA ADEEGSIGA ARDAYGA

**Foom2026** – HESHIISKA SANADLAHA AH EE ISTICMAALKA TEKNOLOOJIYADA DEGMADU LEEDAHAY

**Book-gacmeed 2026** – BARNAAMIJKA AALADA TELEFOONKA EE DEGMADU LEEDAHAY

Sharciyadan waxaa laga heli karaa Websaydhka HPS, waaxda teknolojiyada boga cinwaankiisu yahay isticmaalka masuuliyada (<https://www.highlineschools.org/departments/technology-services>)

**NIDAAMKA LA RAACAYO HADII UU LUMO QALABK ARDAYGU**

Dugsiyada Hiighline waxay u dhaqmaan sidii ganacsi caymis leh. Shayga la xado ama la waayo, kooxda maaraynta khataraha ayaa go,aamiya in shaygaasi caymis lahaa iyo in kale, hadii shaygaasi aanu caymis lahayn waxaa laga yaabaa in aad adigu masuul ka noqon doonto. Fadlan eeg maclumaadka hoos ku qoran ee qeexaya qalabka araygu u qaato guriga iyo kuwa uu ku isticmaalo Dugsiga, waxaa jira waqtio la soo sheego qalabka la waayo iyo masuuliyiin lala socod siyo.

- Xafiiska Dugsiga ku soo ogaysii mudo 24 saacadood gudahood qalbka lawaayay. Tani waa shuruud khusaysa teknolojiyada la xado ama luma ee degmao dugsiyeedka oo dhan. Waxaa waajib ah in ardaygu sheego wixii maclumaad ah ee uu ka xasuusto shayga la waayay(sida noociisa iyo numbarka shayga).
  - Shayga la xaday ka soo diiwaan geli waaxda booliska mudo 24 saacadood gudahood. Waa in la buuxiyo foomka booliska marka la ogaado in shaygaa la xaday iyadoo la eegayo sharciyada degmadaas u yaala. Fadlan u soo gudbi dugsiga numbarka dacwada ee boolisku ku siiyay.
- \* Fadlan waxaad ogaataa, hadii shay la xado/la waayo la soo ogaysiin waayo dugsiga mudo 2 cisho gudahood, shayqaa waxaa bedelkiisa bixin doona ardayg.

**HEERKA KAALMADA DUGSIGAAGA**

Dugsi kasta waxaa uu leeyahay farsamayaan u gaar ah. La xiriir xafiiska dugsiga si aad u hesho kaalmada farsamayaqaanka. Hadaad u baahato in baasweedka?password wax laga bedelo, fadlan la xiriir qof kamid ah shaqaalahu dugsiga.